

Warside bille ah oo ay soo saarto hay'adda Gargaarka Africa 'ARC'

(10 PAGE) WED ,2 MAY 2022 Shacbaan 1443 Hargeisa-Somaliland



WASIIRKA MAALIYADDA IYO
GUDDOOMIYAHA BAANKA DHEXE EE JSL
OO BOOQASHO KU YIMID XARUNTA ARC



ARC OO CIDSISAY 138
AGOON AH

ARC Oo Qodday Laba Ceel-Biyood Oo Ay Ka Faa'iidaystaan Karaan 200 Oo Qoys



Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa laba ceel biyood ka hirgelisay deegaanka Baladweyne ee gobalka Hiiraan, dawlad-gobaleedka Hirshabeelle. Labada ceel oo ay sida oo kale la socdaan kaabayaasha muhiimka u ah ee ay ka mid yihiin bambka biyaha soo tuuraya iyo darka ay xooluhu ka cabbayaan, waxaa loogu talagalay in ay ka faa'idaystaan in ka badan 200 oo qoys oo deegaanka ahi. Ceelashani waxa ay qayb ka yihiin mashaariicda biyaha iyo ceelasha ee ay hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ka fuliso deegaanno badan oo ka mid ah Somaliland iyo Soomaaliya, kaas oo ay ujeedadiisu tahay u adeegista qoysaska Saboolka ah iyo xakamaynta khatartaha biyo yaraanta ee dhaca xilliyada abaarta oo aanay dad badani helin biyo la cabbi karo oo ku filan.



ARC oo fulisay qalliino Indha-jeexid ah



Hay'adda gargaarka Afrika – ARC ayaa magaalada Muqdisho ee caasimadda Soomaaliya ka hirgelisay afar qalliino oo indha-Jeexid.

Qalliinada indhaha loogu jeexayo dadka saboolka ah ee caadku fuulay ayaa qayb ka ah, mashaariicda samafalka caafimaadka ee ay ARC ka fuliso Somaliland iyo Soomaaliya, iyada oo maalgelinta ka helaya samafalayaasha dalka Kuweyt. Waxa aanay ujeedadiisu tahay in la kaalmeeyo dadka saboolka ah ee caafimaadkoodu u baahanyahay qalliino aanay lacagteeda iska bixin karin.



ARC Oo ciidsiisay 138 Agoona Ah



138 carruur agoona ah ayaa ay hay'adda Gargaarka Afrika – ARC dharka Ciidda ugu qaybisay magaalada Muqdisho ee xarunta Soomaaliya.

Mashruucan ayaa ay ujeedadiisu ahayd in quluubta agoonta saboolka ah lagu beero farxad iyo raynrayn ay bulshada inteeda kale kagala qaybqaataan damaashaadka maalinta Ciidda. Si kor loogu qaado isku tiirsanaanta iyo xoojinta qiyamka isu naxariisasho ee qaybaha kala duwan ee bulshada, gaar ahaan xilliyada ciidaha iyo munaasabadaha kale ee Diiniga ah.



Mashruucani waxa uu ka mid yahay mashaariicda samafalka bulsho ee ay hay'adda ARC ka fuliso deegaanno kala duwan oo ka mid ah dhulka Soomaalida, gaar ahaan xilliyada oo jiraan munaasabadaha ay dadka saboolka ahi ugu baahi badan yihiin

Agoonta Xarunta Al-Nuur Ayaa Looga Faa'iideeyey Mashruuca Qaybinta Hilibka

Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa hilbaha mashruuca Gawraca iyo wanqasha uga faa'iidaystay ardayda agoonta ah ee lagu daryeelo xarunta Al-nuur magaalada Boorama. Waxaana ka faa'idaystay 3 boqol oo ka mid ah ardayda la kafaalaqaaday ee xarunta Al-Nuur oo hoostagta hay'adda ARC.

Mashruucan oo ay hay'addu ka hirgeliso deegaanno iyo degmooyin badan oo Somaliland iyo Soomaaliya ah, ayaa ay ujeedadiisa guud tahay daryeelka nafaqo iyo caafimaad ee agoonta la kafaalaqaaday ee ku nool xarumaha daryeelka agoonta iyo waxbarashada ee ay maamusho hay'adda ARC oo ay hirgelintiisa suurtagelisay hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA.



Wasiirka Maaliyadda Iyo Guddoomiyaha Baanka Dhexe Ee JSL Oo Booqasho Ku Yimid Xarunta ARC



Guddoomiyaha hay'adda Gargaarka Afrika – ARC Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi ayaa xarunta dhexe ee Hargeysa ku soo dhoweeyey wasiirka horumarinta maaliyadda mudane Sacad Cali Shire iyo guddoomiyaha Bangiga dhexe mudane Eng. Cali Cabdillaahi Daahir oo booqasho ku yimid. Masuuliyiintan ayaa soo indha-indheeyey habsami u socodka hawlaha qaybaha kala duwan ee xarunta waxbarashada iyo hawlaha samafalka ee Kuweytiga; Mac-hadyada farsamada gacanta iyo xirfadaha, hoyga agoonta iyo beerta Khayraat ayaa ka mid ahaa meelaha ay tageen. Guddoomiye Dr. Mucaallimi ayaa waftiga uga warbixiyey mashaariicda kala duwan ee hay'adda ARC ka waddo goballada kala duwan ee Somaliland, waxa aanu hoosta ka xariiqay in mudnaanta hay'addu ay tahay taageeridda waxsoosaarka iyo horumarinta bulshada maxalliga ah, taas oo ka turjumaysa yoolkeeda oo ah in qofka la dhiso si bulshada u dhisanto.

Dhinaca kalana waxa uu u mahadnaqay iskaashiga iyo hawl-fududaynta joogtada ah ee ay hay'addu ka hesho xukuumadda oo uu ugu horreeyo madaxweyne Muuse Biixi Cabdi iyo golaha wasiirrada ee ay hawlaha shaqo ee hay'addu galaan.



Kuliyadda Xanaanada Xoolaha Iyo Beeraha Sheekh Oo Aqoon Korodhsi Ku Timid Beeraha - ARC

Al-khayraad ee ay hay'adda ARC ka hirgelisay magaalada Hargeysa. Injineer Daariq Alcarabi, masuulka beeraha horumarineed ee ARC iyo tiro ka mid ah hawl-wadeennada Beeraha ayaa soo dhoweeyey Mudane Maxamed Cabdiraxmaan, ku xigeenka hormuudka kuliyadda iyo 31 ka mid ah ardayda.

faahinno dheeraad ah ayaa laga siiyey qaabka ay u shaqayso beerta. Beerta Alkhayraat ee xarunta Kuweytigu waxa ay ka mid tahay mashaariicda horumarinteed ee ay hay'adda Gargaarka Afrika ka fulisay Somaliland. Waxaa ka baxa noocyada kala duwan ee khudrada iyo midhaha oo waxsoosaarkeedu uu il quudineed u yahay xarumaha samafalka iyo kafaalaaqaadka ardayda, sida oo kalana uu shaqa abuur yahay, iyada oo dakhliga ka soo baxana lagu Kaabo mashaariicda samafal ee kala duwan ee ay hay'adda ARC u waddo bulshada.

Ardayda iyo maasuuliyiinta beeraha ee kuliyadda xanaanada Xoolaha iyo beeraha ee Sheekh ayaa bookhasho aqoon-korodhsi ah ku yimid beeraha

Socod aqoonkorodhsi iyo indha-indhahyn ah ayaa ardayda lagu soo mariyey dhammaan qaybaha kala duwan ee beeraha Al-khayraat, sida oo kalana faah-



Hawlwadeennada Nadaafadda Ee ARC Oo Tababar Loo Qabtay



'Tababar hal-ku-dheggiisu ahaa, Isticmaalka habboon ee maaddooyinka nadaafadda' ayaa 26 kii May 2022 xarunta Kuweytiga loogu qabtay dhammaan shaqaalaha nadaafadda u qaabilan hay'adda Gargaarka Afrika – ARC iyo qaybaha kala duwan ee xarunta Kuweytiga. Tababarkan oo uu soo qabanqaabiyey xafiiska loojistikada ee hay'adda ARC oo kaashanaysa waaxyaha arrimaha maamulka iyo shaqaalaha, waxaa bixi-naysay shirkadda 'NICE' ee agabka nadaafadda. Wakiil ka socda shirkadda ayaana tababartayaasha siiyey casharro

la xihidiidha xeeladaha nadiifinta taya-da badan iyo hannaanka xarumaha kala duwan looga dhigi karo kuwo laga dilay bakteeriyada, isla markaana muddo dheer nadaafaddoodu waari karto, iyada oo haddana la adeegsanayo hab dhaqaalaha la dhowrtaynayo. Waxa kale oo hawl-wadeennada la baray siyaabaha ay isaga ilaalin karaan maaddooyinka wax lagu nadiifiyo oo inta badan kiimikoo-yin ay ku jiraan. Casharrada kaddib, tababartayaasha si loo tuso qaabka ay u shaqaynayaan waxyaabaha la baray, ayaa la soo mariyey Hoolka cuntaynta ee ardayda iyo

qaybta jifka ee arayda ay agoomuhu ka midka yihiin ee lagu daryeelo xarunta Kuweytiga.





Shaqaalaha ARC Ayaa Isugu Yimid Kulan Loogu Damaashaadayo Ciidda Soonfur.

Masuuliyiinta iyo guud ahaan hawlwadeennada kala duwan ee xarunta hay'adda Gargaarka Afrika ARC ayaa sabtidii 7 May 2022 oo ku

beegnayd ka soo noqoshadii fasaxa Ciidda Soonfur, waxa ay isugu yimid kulan ciideed ay isugu hambalyeynaayan farxadda maalintaas. Kulankan

ayaa ay ujeedadiisu ahayd xoojinta xidhiidhka bani'aadamnimo iyo kordhinta xadhkaha walaalnimo, iskaashi iyo isku tiirsanaan ee hawlwadeennada.

Dr. Cabdiraxmaan Almucaallimi, Guddoomiyaha guud ee ARC oo hadal kooban ka jeediyey munaasabadda ayaa hawlwadeennada ka tahniyadeeyey maalintan farxadda leh. Waxa aanu hoosta ka xariiqay in kulannada noocan ahi ay sii adkaynayaan xid-

hiidhka walaalnimo iyo wada shaqayneed, isla markaana abuurayaan jawi damaashaad iyo kalgacal oo ka qaybqaadanaya sii xoojinta tamarta hawlwadeennada iyo kordhinta waxsoosaarkooda.

Dr. Mucallimi waxa uu shaqaalaha ku bogaadiyey guulaha waxqabad ee ay hay'adda gaadhsiiyeen mudadii lagu jiray bisha barakaysan ee soonka, kuwaas oo ay ugu horreeyaan mashaariicda bulsho iyo samafal ee tirada badan ee bishaas qabsoomay.

Dhinaca kalana, mudane Axmed Cabdalladiif ayaa fadhigan ka jeediyey dardaaranno iyo waano xoojinaaya ruuxda diiniga ah ee shaqaalaha, iyada oo mudane Cabdalla Almuqaddam ugu dambayntii ka qaybgala-



**Xarunta
Kuweytiga Oo
Xustay
maalinta
Qarannimada
JSL**

Xarunta waxbarashada Kuweytiga ayaa qabanqaabisay munaasabadda loogu damaashaadayo maalinta qarannimada Somaliland. Arday gaadhaysa 500 oo isugu jira heerarka kala duwan ee waxbarashada, macallimiinta iyo masuuliyiinta kala duwan ee xarunta ayaa ka qaybgalay munaasabaddan oo lagu soo bandhigay heeso waddaniya, gabayo iyo hal-abuurro kale oo qayb ka ahaa damaashaadka iyaga oo lulaya calanka Jamhuuriyadda Somaliland. Masuuliyiinta iyo ardayda kala duwan ee munaasabadda ka hadlay ayaa umadda Somaliland dawlad iyo rayidba ka hambalyeysay sannad-guurada iyo horusocodka midho dhalka ah ee Somaliland ku socoto. Waxa aanay dalka u rajeeyey amni waara iyo horumar ballaadhan.

Dhinaca kalana Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi, maamulaha guud ee ARC ayaa dhambaal tahniyad ah u diray hoggaanka sare, xukuumadda iyo guud ahaan umadda reer Somaliland oo u uu rajeeyey in sannado badan oo dambe ay maalintani ku soo noqoto farxad, horumar, amni iyo xorriyad.

Sannad kasta bishiisa shanaad (May) marka ay 18 tahay, Somaliland waxa ay u dabbaaldegtay xuska maalinta la soo noqoshada madaxa bannaanida.



Imtixaanka Dhammadka Oo Arday Ka Badan 9 Kun Uga Bilowday Xarumaha Waxbarashada Kuweytiga



Imtixaanka dhammaadka sannad-dugsiyeedka 2021/2022 ayaa sabsidi 21 May ka bilowday dhammaan dugsiyada iyo xarumaha waxbarashada Kuweytiga ee Somaliland iyo Soomaaliya. Xafiiska Barbaarinta iyo waxbarashada ee hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa si dhammaystiran u agaasimay jawiga deegaan iyo nafsadeed ee ay imtixaanaadku si habsami ah ugu qabsomi karayaan ardayda marxladaha kala duwan ee imtixaanka u fadhiisanaya. Kuwaas oo sannadkan ay tiradoodu dhantahay 9074 arday oo ah dhammaan

dugsiyada iyo xarumaha Kuweytiga ee dhulka Soomaalida. Dhinaca kalana maamulka hay'adda ARC oo ay hoostagaan dugsiyada iyo xarumaha waxbarashada Kuweytiga ayaa bogaadiyey diyaargarowga waaxda waxbarashada iyo sida habsamida ah ee ay imtixaanadu ugu bilowdeen. Dugsiyada iyo xarumaha waxbarashada Kuweytiga ee ay hirgelisay isla markaana maamusho hay'adda ARC waxaa maalgelisa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA oo xarunteedu dalka Kuweyt tahay.



Hadhimo Sharafeed Lagu Maamusay Shaqaalaha Xarunta Al-Amal

Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa khamiistii 12 May 2022, waxa ay hadhimo sharafeed ku maamustay shaqaalaha iyo masuuliyiinta kala duwan ee xarunta waxbarashada Al-Amal ee magaalada Garroowe, caasimadda dawlad-gobaleedka Puntland. Munaasabadda oo loogu dabbaaldegeyey dhammaadka sanad-dugsiyeedka 2021/2022, waxa ay qayb ka ahayd kulannada iyo hawlaha bulsho ee ay ARC u qabato hawladeennadeeda, si kor loogu qaado isku duubnimada iyo ruuxda iskaashi ee shaqaalaha, loona sii xoojiyo isbarashadooda.





لجنة أفريقيا للإغاثة
مكتب الصومال

[Twitter](#) [Facebook](#) [YouTube](#) [Instagram](#) @africanreliefco

مسارات
خيرية CHARITABLE
PATHS